

## Carruurta cusub ee dugsiiga aan weli gaarin (3 ilaa 5 sanadood)

### Asalka qoraalka

Carruurta 3 ilaa 5 waxay bilaabayaana inay bartaan amniga, laakiin badanaa ma fahmaan ama ma xasuustaan xeerarka amniga. Carruurta da'daana weli waxay u baahan yihiin qof weyn oo si degan u kormeera.

Carruurta dugsiiga weli aan gaarin waxay u baahan yihiin xafidaad gaar ah:

- Gubashada iyo gubshada biyuhu ku galaan
- Dhicida
- Qarqida
- Sumoobida
- Hafashada
- Ku dhaawacmida wadada (sida, iyadoo gaari kugu dhaco markaad gaariga saran tahay)

### Waxyaallaha amniga laga hubinayo

- ✓ Xaqiiji inaad isticmaasho xoojiyaha kursiga marka ilmahaagu gaaro 18 kg.
- ✓ Ka fogee ilmaha cabitaanka kulul. Waxyaallaha kulul dabool. Si amaana uga fogee ilmaha markaad wax karinayso ama samaynayso cabitaan kulul.
- ✓ Xaqiiji in carruurta walxaha khatarta ah lagu xiro meel (sida daawada iyo walxaha wax lagu nadiifiyo) halkaas oo aan ilmuhugaari karin.
- ✓ Ku rakib alaarmiga dabka (joogto u tijaabi batterigana bedel laga bilaabo 1da Abriil sanad walba).
- ✓ Hoos ugu dhig xaraarada biyaha kulul ee gurigaaga ilaa 50 degree oo ah Celsius. Biyaha tuubada oo aad u kulul waxbay gubi karaan.

### Tusaalayaasha amniga

Carruurta da'daan waxay jecel yihiin inay sameeyaan waxa dadka waaweyni sameeyaan. Waxay kaloo jecel yihiin inay fahmaan shuruucda.

U sharax carruurtaada sababta aad u leedihiin shuruucda amniga. Tus sida aad u raacdo shuruucda amniga (tusaale ahaan, markaad gaariga wado). Waxaad tahay ilmahaaga macalinkaasi ugu fiican.

### GURIGA GUDAHIIISA

Carruurta da'daana waxay khatar u yihiin waxay doonayaan inay sameeyaan laakiin si amaana uma qabankaraan – sida istoofta iyo timaqalajiyaha. Had iyo jeer kormeer carruurta markay ku jiraan musqusha iyo jikada.

Carruurta aan dugsiiga gaarin waxaa isaguna soojiita kandhaliska, kibriitka iyo laytarka wax lagu daaro – laytariska iyo kibriityada dhig meel aan carruurta gaarin.

Weligaaba ha kaga tegin kibriityada iyagoo aan lala joogin ama iyagoo caruuri hayso.

Maadama cayaaraha mala awaalka ahi ay muhiim u yihiin carruurta aan dugsiiga gaarin koritaankooda ku

mergashada iyo ku xiranka neeftu badanaa wuxuu ka dhacaan wax cusub – firijika la nacay wuxuu noqdaa markab; sanduukha bustuhu wuxuu noqdaa guri lagu cayaaro. Kormeer carruurta markay cayaarayaan siina goob amaana.

Had iyo jeer kormeer carruurta aan dugsiiga gaarin markay biyaha ku jiraan. Kuwaan waxaa ku jira qubayska, jidhaanta, harada qubayska, biyagaleenka iyo xeebta.

Had iyo jeer kormeer carruurta markay xayawaan la joogaan, khaasatan eyda maadamaa qaniinidu ay tahay wax badanaa dhaca. Bar carruurtaada sida loola dhaqmo xayawaanka iyo in aany marna taaban ama u dhowaan eyda aan la aqoon iyada oo aan la weydiin cidda iska leh.

### MEESHA LAGU CAYAARO

Ku hay ka yar 5 sano qalabka ka dheer 1.5 mitir xaqiiji in qalabku leeyahay meel la cuskado, meel wax celisa iyo wax ku wareegsan.

Istaag ilmahaaga dhinaciisa markay ilmuhu meel fuulayo ama korayo qalab laisku ruxayo oo ka sarreeya dhulka. Waa inaad ku dhow dahay si aad uga celso in ilmuhu soo dhaco.



Ku cayaar meel haddii dhicidi timaado hoos u dhigta khatarta imaan karta marka ilmuhu dhaco. Meesha rabbarka la saaray ama laga buuxiyey ciida ayaa caawimaysa. Had iyo jeer u sheeg dhibaato kasta oo ka jirta qalabka lagu cayaaro qolada bixisa. Sida dawlada hoose.

Hubi ilmahaaga ka hor intaadan aadin meesha lagu cayaaro. Ka fogee ilmaha wax kasta oo cunaha istaagi kara ilmaha. Kuwaas waxa ku jira xargaha, iskaafka, koofiyada baaskiilka, xargaha lagu boodo ama xargaha la jiido.

## GAARIGA IYO WADADA

Ilmahaagu wuxuu u baahan yahay kursiga ilmaha mar kasta oo aad gaari raacdo. Weligaa ilmahaaga ha ku qaban dhabtaada ama suunka ha la wadaagin.

Marna ha dhigin kursiga ilmaha qaybta hore. Midaani waa muhiim weliba haddii boorsada hawadu gaariga ku rakiban tahay.

Carruurta aan dugsiga gaarin waxay u baahan yihiin kursi ilaa ay gaaraan 18 kiilo, u samee xoojiye kursiga. Xoojiyuhu wuxuu anfaca in suunka kursiga si fiican loogu xiro jirka.

Kursi xoojiye badan ayaa loo isticmaali karaa suunka amaanka ee ilmaha. Weligaa ha isticmaalin xoojiye leh suunka kursiga – marka laga saaro meeshay iska galaan suunka amaanka ilmaha.

### Rakibida ilmaha kursiga lagu xiro

Haddii aad u baahan tahay inaad ku rakibto kursiga ilmaha lagu rido ama talada kursiga ilmaha lagu xiro oo anfacya gaarigaaga iyo baahida shakhsiyeed la xiriir Kidsafe WA tel: 1800 802 244 wixii macluumaada oo intaas ka badan.

### Doorashada kursiga gaariga ilmaha aan dugsiga gaarin:

Waxaa jira dhowr nooc oo kuraasa si ay ugu habonaadaan kooxdaan:


- Kursi la bedbedelikaro (0 - 18kg)
  - Horay u jeeda : 8 ilaa 18kg
- gurboodka (8kg ilaa 18kg)
- koraas isku jirta (8 ilaa 26kg)
  - Gurboodka: 8 ilaa 18kg oo leh xariga amniga ee hoose
  - Booster function: 18 ilaa 26kg xariga amniga ama suunka kursiga laabta
- Booster Seat (14 ilaa 26kg)
  - Oo leh suunka kursiga laabta
  - Leh xariga amaanka ilmaha



Kursiga lagu xiro gurboodka  
8 ilaa 18 Kg  
Qiyaas ahaan 6 bilood  
ilaa 4 sanadood



Kursiga xoojiyaha ah  
(Suunka kursiga ama ilaaliyaha amniga ilmaha)  
14 ilaa 26 Kg  
– Qiyaas ahaan 3 ilaa 8 sanadood



Kan loogu daro gurboodka/xoojiyaha kursiga ilmaha  
8 ilaa 18 Kg oo leh ilaaliyaha amniga, 18 ilaa 26 Kg kursi xoojiye ama  
ilaaliye ahaan  
Qiyaas ahaan 6 bilood ilaa 8 sanadood

## BAASKIILADA

Kuwa aan dugsiga gaarin waa inay fuulaan nooca saddexda taayir leh, maaha kuwa labada taayir leh. Waa in la kormeeraa had iyo jeer. Ha u ogolaan carruurta aan dugsiga gaarin inay wadada ku maraan baaskiilkooda.

Dooro baaskiilada ku haboon baaxada ilmahaaga. Ilmuhu waa inuu lugaha la heli karaa dhulka markuu ku fadhiyo kursiga.

Xaqiiji in ilmahaagu qaato koofiyada baaskiilka oo sida khaaska ah loogu sameeyey kooxdaan. Hubi astaanta sheegaysa inuu leeyahay mustawaha Australia.

Had iyo jeer qabo gacanta ilmahaaga markaad wadada ku dhowdahay, meesha guriga laga galo, iyo gaadiidka kale. Bilaw inaad barto intay yar yihiin sida si amaana wadada loogu gooyo.



### SUMMARY - STAGE OF DEVELOPMENT INJURIES(please translate this)

Falalka Koritaanka	Khatar/khatar ku jirid
Ka korida xagga dhaqdhaqaaqa: gaarida meela kore 'amaan' meelo, fuulitaan	Calaalin, gubasho, dhicid
fuulid/wadid baaskiil	Ka hadlida dhaawacyada, shilalka wadada
Ku xirnaanta oo siyaada (kindy, playgroups)	Shilalka gaariga, dhicida
Raadin joogta ah iyo sahaminta adduunka	Gubashada (kibriitka/laytariska)
Cayaarida doorka iyo iska dhigida	burburinta (sumow), gubasho, qarqid, neef ku dheged, dhicid
Diidida xirida (sida kursiga gaariga)	Shilka wadada

### Macluumaad kale oo la heli karo

Macluumaad faahfaahsan oo intaas ka badan oo mawduucyada halkan lagu soo sheegay [www.kidsafewa.com.au](http://www.kidsafewa.com.au) ama la xiriir Kidsafe WA tel 1800 802 244 si aad u hesho macluumaad iyo talo mucayina.

#### Kidsafe WA © 2007

Qayb ka mid ah ayaa la koobiyeyn karaa waxbarasho darteed. Ogolaansho ayaa looga baahan yahay si koobiyaysto xaashidaan dhamaanteed.

Macluumaad intaas ka badan ☎ (08) 9340 8509  
Khadka Macluumaadka Amniga Ilmaha ☎ 1800 802 244  
Khadka Macluumaadka Sunta ☎ 13 11 26

[www.kidsafewa.com.au](http://www.kidsafewa.com.au)